

Waqtiga dhaqaaleyso!

Ka Hel Dheefaha Dadweynaha
Online-ka

Akoonka Dheefta Macmiilka

4

Hawlgeli Akoonkeyga Dheefta Macmiilka (CBA)

- Eeg email-kaaga Xaqijinta.
- Booqo www.WashingtonConnection.org.
- Ka dooro Gal Akoonkaaga taxaalka hoosta loogu dhaadhaco ee Gelidda ee ku yaalla xagga sare ee mareegtada. Ku gal Aqoonsiga Adeegsadaha SAW ee aad u adeegsatay diiwaangelinta CBA-gaaga.
- Dooro Hel Maclumaadka Akoonka Dheefta Macmiilka ee ku taalla bogga Soo Koobidda.
- Isticmaal koodhka hawlgelinta ee email-ka lagu bixiyay. Sidoo kale isticmaal Aqoonsiga Macmiilka DSHS iyo summada degaanka guriga
- Dhagsii **Badhanka** xiga.
- Waxaad heli doonta farriinta Hawlgelinta Akoonka ee Washington Connection. Dhagsii linkiga Ka-bax ee ku yaalla geeska sare ee midigta ah.

5

Gelidda Akoonkeyga Dheefta Macmiilka (CBA)

- Dhagsii badhanka **Gal Akoonkaaga (Access Your Account)** ee ku yaalla tab-ka **Gal/Login** ee ku yaalla xagga sare ee mareegtada Washington Connection.
- Geli aqoonsiga adeegsadaha iyo erey-sireedka.
- Dhagsii **Gudbi**.
- Kani waxaad ku gelaysaa boggaaga hoyga. Dhagsii badhanka CBA-keyga/My CBA ee ku yaalla xagga hoos iyo kor loogu dhaadhaco Akoonkeyga/My Account.
- Akhri **Ogeysiiska Akoonka Dheefta Macmiilka**. Dhagsii **Aqbal** in aad eegto xogta aasaasiga ah ee kiiskaaga ku saabsan.

Waxaad ka geli kartaa akoonka dheefaha macmiilkaaga mareeetadan bilaashka iyo ammaanka ah saacad kasta.

Maclumaadka Muhiimka ah ee aad u baahan karto si aad u abuurto oo aad u hawlgeliso CBA-gaaga (keliya loogu talagalay isticmaalkaaga shakhsiyed).

Aqoonsiga Adeegsadaha _____

Koodhka Xaqijinta _____

Lambarka Aqoonsiga Macmiilka _____

Summada Degaanka Guriga _____

Koodhka Hawlgelinta _____

Kupo kale _____

DHIB MA KALA KULANTAA?

Waxaad ka heli kartaa maclumaad dheeraad ah barta Washington Connection **tab-ka** Ku Saabsan Bartan.

The screenshot shows the Washington Connection website. At the top, there's a navigation bar with links for 'Login', 'Create Account', and 'About This Site'. Below the header, a banner says 'WASHINGTON CONNECTION your link to services'. The main content area has a 'Welcome' section explaining benefits like food, cash, child care, etc. It includes a 'See if I Qualify' button. To the right, there's a video player showing a woman speaking about services, with a timestamp of 5:03. A sidebar on the left lists options like 'See if I qualify', 'Apply Now', and 'Renew my annual benefits'.



24/7 gal:

- Dheefaha hadda
- Taariikhda dheefta
- Dokumentiyada la soo gudbiyey
- Taariikhaha muhiimka ah
- Xiriirka/Linkiga lagu helayo baaqiga kaarka EBT iyo codsiyada beddelka
- Dib-u-eegistaada Shahaaddada-Dhexe





Iskaan-garee koodhka QR ama booqo
WashingtonConnection.org si aad u codsato Cunto,
 Kaash, Kaalmada Daryeelka Carrurta, Classic Medicaid
 iyo waxyaabo kale.

Ma dooneysaa in aad waqtigaaga dhaqaaleysato?

Kuwan waa tallaabooyinka loo maro
 hab degdeg ah, fudud, oo amaan ah
 oo lagu heli karo macluumaadka
 acoonkaaga dheefta DSHS.



Ka hor inta aadan bilaabin,
 waxaad u baahan doontaa:

- In aad internet-ka gasho
- Akoon email
- Lambarka Aqoonsiga Macmiilka ee DSHS
- Ogow summada degaankaaga
- Magacaaga sida uu ugu muuqdo
 diiwaannada DSHS
- Dheefaha DSHS:
 - Dheefaha DSHS ee hawlgalayay 60kii
 maalmood ee ugu dambeeyay

* Haddii aad durba haysato acoonka Washington Connection
 SAW oo hawlgaley, u gudub **tallaabada 3aad**.

1 Abuur ama Ku-xiriir Akoonka SecureAccess Washington (SAW)

- Booqo www.WashingtonConnection.org.
- Dhagsii badhanka **Samee Akoon Cusub/Create New Account** ee ku yaalla xagga hoos iyo kor loogu dhaadhaco ee Samee Akoon/Create Account.
- Buuxi goobaha xogta ee ku yaalla bogga **Samee Akoonka Adeegsadaha Cusub**.
- Dhagsii **Badhanka** xiga.
- Dhagsii email-kaaga ee koodhka xaqqijinta.

* Haddii aadan helin email-ka xaqqijinta, eeg galakaaga junk/spam. Haddii aadan isticmaaleyn telefoon casri ah, waxaad u baahan doontaa in aad mareegtada xirto ka hor inta aadan hawlgelin acoonkaaga.

2 Hawlgeli Akoonkeyga Washington Connection- Ku-xiriira SAW

- Fur emailka hawlgelinta.
- Dhagsii linkiga ee Tallaabada 2aad email-ka si aad u hawlgeliso Aqoonsigaaga Adeegsadaha.
- Dhagsii linkiga **Gal/Login** ka-dibna ka gal bogga mareegtada Xaqqijinta – **Akoonka Adeegsadaha Cusub**.

- AMA -

- Booqo xagga sare ee mareegtada ka-dibna dooro tab-ka **Samee Akoon/Create Account**. Dooro badhanka **Hawlgeli Akoonkaaga**.
- Geli **Aqoonsigaaga Adeegsadaha** iyo **Koodhka Xaqqijinta** ee loo soo direy email-kaaga.
- Dhagsii **Badhanka** xiga.
- Dhagsii link-iga **Gal/Login**.
- Geli Aqoonsigaaga Adeegsadaha, Erey-sireedkaaga ka-dibna dhagsii **Gudbi/Submit**.

Mareegtada Washington Connection ayaa lagu heli karaa luuqadaha Ingiriiska iyo Isbaanish.

Akoonkaaga Washington Connection-Ku-xiriira SAW wuu bilowday. Waxaad diyaar u tahay in aad sameyso Akoonkaaga Dheefta Macmiilka.

3 Diiwaangeli Akoonka Dheefta Macmiilka (CBA)

- Dhagsii badhanka **Gal Akoonkaaga** ee ku yaalla xagga hoos iyo kor loogu dhaadhaco **Gal/Login**. Ku gal Aqoonsiga Adeegsadaha SAW iyo erey-sireedka. Dhammeystir tallaabada xaqqijinta isirrada badan (MFA). Tani waxay xaqqijinaysaa aqoonsigaaga. Dooro in aad ku hesho koodhka midkood ciwaanka emailkaaga ama lambarta telefoonka. Nidaamka wuxuu ku geyn doonaa bogga Soo Koobidda marka tani la sameeyo.
- Waxaad hadda leedahay Akoonka Dheefta Macmiilka. Dhagsii linkiga Hel Macluumaadka Akoonka Dheefta Macmiilka ee ku yaalla bogga Soo Koobidda.
- Buuxi dhammaan goobaha/fields ee foomka diiwaangelinta. Istimmaal summada degaanka guriga iyo macluumaadka dhabta ah ee DSHS galka ugu jira.
- Dhagsii **Badhanka** xiga.
- Eeg email-kaaga. Farriin ayaa kuu sharxi doonta tallaabada xigta ee lagu hawlgelinayo Akoonkaaga Dheefta Macmiilka (CBA).

La sii wadey...

